Isbeddellada Guud ee ugu Muhiimsan

20kii Luulyo, saddex hay'adood oo kuwa Qaramada Midoobey ah – Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobey, Waaxda Qaramada Midoobey ee Bedqabka iyo Ammaanka (UNDSS) iyo Xafiiska Siyaasadda Qaramada Midoobey ee Soomaaliya (UNPOS) – ayaa ay Al Shabaab ka mamnuucdey in degaannada ay xukumaan ka hawlgalaan. Ka dib markii ay soo saareen war-saxaafadeeddii ay ku mamnuucayeen, ayaa maliishiyaadka Al Shabaab waxa ay galeen xafiisyadii xarumihii hay'adahaas ee Baydhabo iyo Waajid waxaana ay bililiqeysteen qalabkii isgaarsiinta degdegga ahaa, qalab xafiis iyo baabuur. Qaramada Midoobey ayaa soo saartey shaqaalihii caalamiga ahaa waxaana ay si ku meel gaar ah u hakisey hawlahii ay ka waddey Baydhabo. Qaramada Midoobey qaybteeda Soomaaliya ka hawlgasha ayaa soo saarey war-saxaafadeed isla maalintaa taas oo lagu yiri in ay rajeynayso in maamulku uu dib uga fekero go'aamadaan ay gaareen ayna u oggolaadaan in gargaarka bani'aadamnimada ee muhiimka ah uu ka socdo Baydhabo iyo degaannada ku hareereysan. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey ayaa sidoo kale cambaareeyey dhacdadaan isaga oo yiri, "Qaramada Midoobey waxa ay gargaar nafo lagu badbaadinayo ay dadka ku baahan ku siineysaa Soomaaliya oo dhan, waxaana ay sii wadi doontaa in ay sameyso wixii ay karto oo dhan si ay gacan uga geysato in uu dalkaa ka soo baxo rabshadda socotey tobanaanka sano."

17kii Luulyo, saddex shaqaalaha gargaarka oo ajnebi ah ayaa laga afduubey magaalo xuduudda Kenya ku taalla waxaana Soomaaliya u kaxaystey dabley Soomaali ah oo aan haybtooda la garan. Halka ay ku sugan yihiinna lama garannayo. 21kii Luulyo, xubin ka tirsan shaqaalaha Bisha Cas ee Soomaaliyeed ayaa lagu diley xabado la isku-dhaafsadey bartamaha Muqdisho isaga oo ku safrayey gaari gaadiidka dadweynaha ah. Ilaa bishii Jannaayo, siddeed shaqaalaha gargaarka bani'aadamnimada ah ayaa nafahooda ku waayey Soomaaliya.

Toddobaadkan gudihiisa, dagaallada u dhexeeya ciidamda dowladda iyo muqaawamada ayaa ka sii darey degmooyinka Hodon, Dharkeenley, Wardhiigleey, Boondheera iyo Kaaraan ee magaalada Muqdisho. Ugu yaraan 40 qof ayaa ku dhintey waxaana ku dhaawacay in ka badan 60 kale. Ilaa 1dii Juunyo, 141,000 oo qof ayaa ka barokacay Muqdisho iyada oo 39,000 ay u guureen goobo kale oo isla magaalada ah, 37,000 oo kale waxa ay u guureen Waddada Afgooye iyo 64,000 oo aadey meelo kale oo dalka ka mid ah.

Shabakadda Ka Sii Digista Abaaraha (FEWSNET) ayaa war ay soo saartey 18kii Luulyo ku sheegtey, in xaaladda haqab-beelka cuntada ee Soomaaliya aan la rajeyneynin in ay si weyn u soo wanaagsanaato lixda bilood ee soo socda iyo in tirada dadka u baahan gargaarka bani'aadamnimada ay weli ahaan karto mid sarreysa. Arrintan ayaa u sabab ah badashada iskahorimaadyada hubeysan, barokaca iyo abaarta ee dalka. Natiijooyinka qiimeynta xilliga Gu'ga ka dambeeya ee Bisha Agoosto ay soo saareyso Waaxda Lafagurka Haqab-beelka Cuntada iyo Nafaqada (FSNAU) ayaa gacan ka geysan doona fahamka sida ay xaaladdu noqoneyso.

WFP ayaa si degdeg ah ugu baahan 209,000 metrik ton oo cunto ah (US$ 208 milyan) si ay u baajiso kalago'a cuntada ee hadda jira si loo quudiyo 3.5 milyan oo Soomaali ah lix bilood oo ka mid ah siddeedda bilood ee la qorsheeyey in uu socdo hawlgalka degdegga ah. Kalago'a cuntada waxaa uu saameyn ku yeelan doonaa in ka badan 1 milyan oo ah dadka nugul ee gudaha ku barokacay iyo ka-faa'iideystayaal kale. In ka badan 500,000 oo carruur ay hayso nafaqo-xumo, haween uur leh iyo kuwo nuujinaya ah ayaa sidoo kale waayi doono il weyn oo ay ka heli jireen nafaqo, ku dhowaad 100,00 oo carruur ah ayaa sidoo kale waayi doona quudkii ay ku heli jireen dugsiga.

Waxqabadka

Toddobaadka gudihiisa, WFP iyo la-hawlgalayaasheeda waxa ay 432 metrik ton oo badeecooyin cunto kala duwan ah u qaybiyeen 3,675 ka faa'iideystayaal oo hoos imaanayey barnaamijyada cunto-shaqo ku beddelashada, quudinta hay'adaha iyo cunto qaybinta guud ee gobollada Hargeysa, Awdal iyo Togdheer ee Somaliland. Ilaa 112,830 ka-faa'iideystayaal ayaa ka faa'iideystey cunto qaybinta guud ee gobollada Galgaduud,

Gedo iyo Bakool waxaana 7,134 ka faa'iideystayaal kale ah ay quudin dheeri ah ku heleen Koonfurta Gaalkacyo ee gobolka Mudug.

Wada-hawlgalayaasha Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda ayaa dadaalladii biyo-dhaaminta ka sii wada gobolka Togdheer iyo qaybo ka mid ah gobolka Sanaag. Xataa iyada oo ay jiraan waxqabadyada hadda socda, ayaa baahiyaha biyaha ee degdegga ah ay sii ahaan doonaan kuwo sarreeya gobolladan, oo uu ka mid yahay gobolka Sool. Wada-hawglayaasha waaxda nafaqeynta ayaa ka jawaabaya baahiyaha iyaga oo gaarey in ka badan 6,000 oo qof oo ku nool gobollada Sool, Sanaag iyo togdheer.

Gobolka Gedo, ururka Veterinaires Sans Frontieres ayaa ka waday olole lagu tallaalayey xoolaha iyaga oo gaarey in ka badan 50,000 oo neef oo isugu jira ido, riyo, geel iyo lo'. Ololaha ayaa lagu higsanayaa in lagu wanaajiyo nolol-raadsiga dadka iyada oo kor loo qaadayo caafimaadka xoolaha.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org. Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org